

## Maxaa ku jira sharciga cusub?

- Laga bilaabo 1da Luulyo, 2017, waxay shaqaalahu heli doonaan 1 saac wakhtiga jirrada iyo daryeelka 30kii saac ee ay shaqeeyaanba iyagoo lasiinayo lacagtoodii caadiga dhinaca mushaarka iyo gunada ahayd wakhtiga ay isticmaalayaan wakhtiga jirrad iyo daryeelka.
- Shaqaalahu waxay u isticmaali karaan wakhtiga jirrada iyo daryeelka caafimaadkooda iyo marka ay lasoo daristo qaar kamida qoyskiisa jirro, dhaawac, ama arin kale oo caafimaad sida balamaha baarintaanka caafimaadka, taryeelka, baxnaaninta, hortaga jirrada.
- Dhibanayaasha xadgudubka guriga, ku xadgudubka galmada, iyo dabagalku waxay xaq u leeyihiin inay isticmaalaan wakhtiga jirrada iyo daryeelka si u helaan gargaar caafimaad, iyo adeegyada kale ee lama huraanka ah.
- Shaqaalahu waxay xaq u leeyihiin inay isticmaalka wakhtiga jirrada iyo daryeelka iyaga oo guriga la jooga caruurtooda marka si lama filaan ah schoolka loo xiro arimo la xiriira xaalad caafimaad ama cimilo oo deg deg ah.

## Yuu sharcigu saameeyay?

- Shirkadaha leh lix shaqaale ama kabadan ee aan horay shaqaalaheedu u heli jirin fasax limid ah ama kan ka deeqsisan kan sharciga wakhti jirro iyo daryeel waa inay u qoondeeyaan shaqaalahooda wakhtig jirro iyo daryeel iyagoo mushaar leh.
- Shirkadaha leh ka yar lix shaqaale waa inay u qoondeeyaan shaqaalahooda wakhti jirro iyo daryeel; waxuuse ahaan karaa wakhtigaasi mid mushar la'aan ah.
- Shaqaalihii ka shaqeeya Minneapolis ugu yaraan 80 saacadood sanadkii wuxuu xaq u leeyahay wakhtiga jirrada iyo daryeelka.

## Sidee baa loo dhaqan galinayaa?

Magaalada Minneapolis waxay dhaqan galinta u fulinaysaa si marxalado ah. Waaxda xaquuqda madaniga ah ayaa baarintaan ku samayn doonta cabashooyinka laakiin waxay shirkadaha ula shaqayn doontaa si firfirconi iyo iskaashi ku jiro. Haddii loo baahdo ganaaxyo kala duwan ayaa la ganaaxi doonaa shirkadaha si wada shaqayn iyo yeelitaan looga helo. Ka aargoosiga shaqaalahu gebi aan waa mamnuuc.

## Hadda laga bilaabo

- Shirkadahu way bilaabi karaan diyaarinta iyo dib u eegista habka raadraaca hada, diiwaangalinta, siyaasadooda fasaxa shaqalaha.
- Daawo [www.minneapolis.gov/sicktimeinfo](http://www.minneapolis.gov/sicktimeinfo) for more information.
- Kasoo qaybgal kulan dhageysi dadweyne ah dayrtan ama nagula soo wadaag aragtidaada shabakada.

Wixii macluumaad dheeri ah, gal [www.minneapolis.gov/sicktimeinfo](http://www.minneapolis.gov/sicktimeinfo), email [sicktimeinfo@minneapolis.gov](mailto:sicktimeinfo@minneapolis.gov) ama wac.

June 2016